

In laga hortago in lala noqdo codsigaaga magangalyodoonka

Macluumaad muhiim ah oo loogu talagalay magangalyodoonka

Somali

Isbeddel dhowaan ku dhacay sharciga magangalyodoonka ayaa suurtagalinaya inay fududdahay in laga dhigo codsigaaga magangalyodoon mid lala noqday. Tan macnaheedu waa in codsigaaga magangalyodoon dhammaan doono: laguma siin doono sharci qaxootinimo oo waad waayi doontaa taageerada magangalyodoon iyo guriga MEARS ku dejisay.

Si looga hortago in lala noqdo codsigaaga magangalyodoon waa inaad:

1. U sheegto Wasaaradda Arrimmaha Gudaha haddii cinwaanka meesha aad deggan tahay uu isbeddelo. Waxaa ka mid ah tirsiga (nambarka) telefoonkaaga ama eemaylkaaga iyo cinwaanka guriga sidoo kale. Waxaad samayn kartaa:

- La soo socodsii Wasaaradda Arrimmaha Gudaha isbeddelka adigoo tagaya meel warbixin lagu bixinayo
- U sheeg Migrant Help – eeg faahfaahinta bogga kale
- U sheeg qareenkaaga

2. Ha ka tagin dalkan Biritayn ka hor inta aan lagu oggolaanin in magangalyo lagu siiyo. Tan macnaheedu waa: waa inaad booqanin Jamhuuriyadda Ireland. Ka sokow dhibta aad kala kulmi karto mas'uuliyiinta hijrada ee Ireland, booqasho gaaban oo aad ku tagto Dublin waxay sababi kartaa in lala noqdo codsigaaga magangalyodoon ee dalkan Biritayn.

3. Si degdeg ah ugu sheeg qareenkaaga haddii aad hesho foom su'aalo ku qoran yihiin ama taariikhda waraysiga.

4. Ka soo jawaab telefoonnada la qorsheeyay ee Wasaaradda Arrimmaha Gudaha.

5. Ka soo qeybgal waraysiyada iyo kulammada warbixinta sida inaad saxiixdo ballammada Drumkeen House.

6. Haddii aad seegto waraysiyada ama waqtiga la doonayo inaad wax soo gudbiso ugu dambayn, si degdeg ah ugu sheeg Wasaaradda Arrimmaha Gudaha sababta aad iman kari wayday oo bixi caddeyn sida warqad caafimaad xaqiijinaysa inaad xanuunsanayd. La hadal urur dadka caawiya oo gacan kaa siin kara ururinta caddaynta loo baahan yahay.

U soo sheeg Migrant Help wixii isbeddel ah

Siyaabo kala duwan ayaad Migrant Help ugu soo sheegi kartaa isbeddelka duruufaha:

- Telefoonka lacag la'aanta ah ee Asylum Helpline waa 0808 8010 503
- Kula sheekaysiga Internetka
- Foomka Su'aalaha oo Online ah
- Email CoC@MigrantHelpUk.org


Marka aad la soo xiriirayso Migrant Help waa inaad sheegto tirsiyada (nambarrada) tixraacyada. Waxaad tixraaca ka heli kartaa warqadaha ay Wasaaradda Arrimmaha Gudaha kuu soo dirtay, sheeg tixraaca haddii aad hayso. Haddii uu urur ku caawinayo wuxuu u baahan doonaa inaad u saxiixdo oggolaansho ku saabsan arrinta ay kaala hadlayaan.

Telefoonka lacag la'aanta ah ee Asylum Helpline waa 0808 8010 503

Adeegga telefoonkan wuxuu noqon karaa mararka qaarkood mid aad mashquul u ah marka aad jawaab sugayso. Waxaa telefoonka la heli karaa 24 saac, 7 maalmood toddobaadka. Waxaa lagugula talinayaa inaad soo wacdo telefoonka waqtiga aan la shaqaynaynin, waa waqtiyada ay dadka qaar u fududdahay in lala hadlo.

Kula sheekaysiga Internetka

Kula sheekaysiga Internetka ee Migrant Help waa hab wanaagsan oo aad u sheegi karto arrimmahaaga oo waxaa la heli karaa 24 saac, 7 maalmood toddobaadka. Marka telefoonka lagaa qabto, u sheeg isbeddelka ku dhacayfaahfaahintaada oo sug inuu kuu xaqiijiyo. Haddii aad rabto waa soo dejisan karta wada sheekaysiga oo meel ku kaydsan kartaa si aad u haysato.



Webchat

First Name *

Last Name *

Subject

NASS Reference

Port Reference

> Chat now


Monday - Sunday: 24 Hours

https://ellis.custhelp.com/app/chat/chat_launch

U soo sheeg Migrant Help wixii isbeddel ah

Foomka Su'aalaha oo Online ah

Waxaad xiriirintan u isticmaali kartaa si aad Migrant Help ugu sheegto isbeddelka ku dhacay duruufahaaga ama duruufaha qof kale. Waa inaad xulato Arrinta iyo Qeybta saxa ah si loo xaqiijiyo in waaxda ku habboon ay wax ka qabato su'aashaada. Waa inaad bixiso macluumaadka lagaaga baahan yahay iyo qoraal kooban ku saabsan su'aashaada tusaale "fadlan beddel telefoonkayga/cinwaankayga oo ahaa X haddana ah X".



<https://ellis.custhelp.com/app/ask>

Email CoC@MigrantHelpUk.org

Haddii aad doorato inaad eemayl u soo dirto Migrant Help, waa inaad isticmaasho cinwaanka eemaylkaaga ay Wasaaradda Arrimmaha Gudaha hayso. Waa inaad kaydsato nuqul ah eemaylka aad soo dirtay. Haddii aad hayso soo raaci tirsiga hal tixraac. Xogtaada qofeed waa inay la mid tahay tan taalla Wasaaradda Arrimmaha Gudaha. Waad u isticmaali kartaa habka warqaddan tusaale ku saabsan waxa aad oranayso.

Product *

Advice and Guidance

Unsure about which Product to select?

Category

Asylum Support Advice
How to Apply for Asylum Support
Change of Circumstance (COC)

Subject *

Please provide as much details as possible. Failure to provide relevant information could delay the resolution of your query. If you are completing this form on behalf of another person, don't forget to upload a signed consent form. The mandatory fields need to be completed with the service user's details but please include your details in the notes.

New Message

To

Subject

Port Ref:
NASS Ref:
HO Ref:

Name:
Date of Birth:
Address:
Nationality:

Dear Migrant Help,

I would like to update my address/phone number on file.

My previous phone number was 07XXXXXXXXXX, my new phone number is 07XXXXXXXXXX.

or

My previous address was XXX, my new address is XXX.

Please update my records accordingly.